Su'aalaha ugu badan ee qaaxada laga waydiiyo iyo jawaabahooda

1. Muxuu yahay cudurka qaaxadu (TB)?

Qaaxadu waa cudur la kala qaado oo ay sababto bakteeriyada qaaxadu ee loo yaqaanno *(Mycobacterium tuberclosis)*. Nooca qaaxada ee ugu badan waa nooca sambabka ku dhaca (waana 70% ee xaaladaha cudurkaas). Noocyada kale sida qaaxada qanjidhka iyo ta lafaha lama kala qaado.

2. Waa maxay qaaxada huruda (qarsoon)?

Qaaxaada huruda (qarsoon) macna-heedu waa in noloshaada mar un ay bakteeriyada qaaxadu jidhkaaga gashay oo ay kugu ridday cudurkaas. Marxaladdan ruuxu **ma jirrana cudurkaasna ma uu qabo.** Dadka cudurkaas uu ku dhacay (ilaa 90%) waligood cudurkaasi ma soo rito.

3. Sidee Qaaxaada lagu kala qaadaa?

Qaaxadu hawada ayey ku gudubtaa ayada oo ruux uu ruuxa kale u gudbiyo. Marka ruuxa qaaxada qaba uu qufoco, waxaa afkiisa ka soo baxa oo hawada raaca dhibco qoyan oo xambaarsan bakteeriyada qaaxada. Dhibcahan hawada ayey ilaa waqti dhex qaadaan waxaana dhici karta in ay dad kale jiidaan oo jidhkooda galaan. Cabsida in qaaxo la qaado waa kali ah marka aad xidhiidh la samaysid **ruux qaaxada sambabka qaba.** (Su'aasha 6aad).

4. Goormaan cudurka qaaxada ka hadlaynaa?

Waa marka qaaxadu ay sambabka ku fiddo. Tani waxay iman kartaa bilo ama sannado ka dib marka uu ruuxu cudurka qaaday. Bakteeriyadu jidhka intiisa kalena way ku faafi kartaa ayada oo raacaysa dheecaanka jidhka (sida qanjidhada, qaybta neerfaha, lafaha). Noocyadaas qaaxada lama kala qaado. Khatarta qaaxadu waxay aad ugu sii darantahay caruurta iyo dadka difaacoodu daciifka yahay. Xilligan aan joogno qaaxada si fiican baa loo daweyn karaa haddii daawaynta si fiican loo maareeyo.

5. Waa maxay calaamadaha lagu yaqaanno qaaxada?

Cudurku wuxuu ku billawdaa wax-yaabo yaryar oo dadku ka sheegtaan. Waxyaabahaas waxaa ka mid ah qufaca (mar marka qaarkood xaakada waxaa la socda dhiig), daal, xoogaa kulayl iyo dhidid habeenkii ah. Heerarka danbe, bukaanku wuxuu dareemi karaa culayskiisoo dhaca, abiteedka oo ka xumaada iyo xabadka oo xanuuna.

6. Goormaa qaaxada sambabka la kali qaadi karaa?

Qaaxada sambabka waxaa la kala qaadi karaa marka cudurku sambabka aad ugu faafo ilaa ay ka gaadho in ruuxu marka uu qufacayo ama hindhisayo uu hawada mariyo dhibcaha bakteeriyada qaaxada. Ilaa marxaladaas laga gaadhayo ruuxu ruux kale uma gudbin karo qaaxada. (Su'aasha 3aad).

7. Ilaa xilligee buu ruuxa qaaxada sambabka gudbin kara sidaas sii ahaan karaa?

Ruuxa qaaxada sambabka gudbin kara waa in meel dhakhtar ah ama guri lagu karantiilaa, taasina waxay ka dhigantahay dadka waa laga saarayaa. **Meeshaas gaarka ah ayaa lagu haynayaa ilaa inta ayna cudurka gudbin karin.** Sida qaanuunku yahay waxay qaadan kartaa laba ilaa seddex todobaad. Intaa ka dib, **mar dambe ruuxaasi ma gudbin karo cudurka.** Laakiin, waa in ruuxaasi uu dawada wataa 6 bilood ama ka badan, ayada oo lagu ilaalinayo, ilaa uu ruuxu si fiican u caafimaado.

8. Yaa khatar ku jira?

Dadka khatarta ku jira waa kuwa usoo dhawaada ruux qaaxada sambabka qaba oo gudbin kara (haddii ay saacado badan hal qol kula jiraan) (Su'aasha 6aad).

9. Waan tallaalnahay. Ma anoo tallaalan buu igu dhici karaa?

Haa, maxaa yeelay tallaalka la qaato ee (BCG) wuxuu ku siinayaa ilaalo yar.

10. Waxaan xidhiidh la sameeyey ruux qaba qaaxada sambabka. Maxaan sameeyaa?

Xafiiska Qaaxada ee Jimciyadda Sambabka (Cantonal Lung Association) ee xaafadaada ayaa kaa siin kara talo iyo tusaale lacag la'aan ah oo ku saabsan qaaxada. Ruux kasta oo xidhiidh dhaw la sameyey ruux qaaxada sambabka gudbin kara (Su'aasha 6aad) wuxuu ballanka qabsan karaa xafiiska qaaxada (cinwaannada lifaaqan) si uu u helo macluumaad iyo si loo baadho oo loo ogaado in uu cudurka qaaday iyo in kale (Su'aasha 12aad).

11. Waxaan xidhiidh la sameyey ruux qaba qaaxo laakiin aan ahayn midda sambabka. Maxaan sameeyaa?

Uma baahnid in aad wax samaysid, maxaayeelay khatar kuma sugnid. Noocyadan qaaxada la isuma gudbiyo maxaa yeelay ruuxa qaaxada qaba afkiisa kama soo baxayaan bakteeriya hawada raacaysa.

12. Sidee lagu ogaan karaa in cudurka la qaaday?

Waxaa lagu ogaan karaa baadhitaanka maqaarka ama baadhitaanka dhiigga (loona yaqaanno inter-feron-gamma test). Macluumaad qaabka baadhitaanka, fasiraadiisa iyo natiijada waxaad waydiin kartaa Xafiiska Jimciyadda Qaaxada ee xaafada (Cantonal Lung Association).

13. Dadka ka wayn 12 jir, baadhitaanka maqaarka iyo/ama ka dhiigga lama sameeyo ilaa ay ka soo wareegto 8 todobaad markii ay ruux qaaxada sambabka qaba ay xidhiidh la sameeyeen. Waa maxay sababtu?

Bakteeriyada qaaxadu tartiib ayuu u battaa, hawlgalka difaaca jidhkuna wuxuu billaabmaa dhawr todobaad kadib. Taasi waxay ka dhigantahay in 8 todobaad ka hor ayna suurtagal ahayn in la ogaado in cudurka la qaaday iyo in kale. Khatarta qaadidda noocan aadka u daran ee qaaxadu waxay kubadantahay caruurta 12 jirka ka yar. Waxaa intaa dheer, cudurkan aad ayuu ugu faafaa caruurta da'aaddaa jooga. Sidaa darteed, si aan isu ilaalinno, **isla markaba** baadhitaan hordhac ah ayaa caruurta lagu sameeyaa ka dib markii ay ruux cudurkaa qaba xidhiidh la sameeyaan, waxaana ku xiga baadhitaan kale oo kaas la xidhiidha 8 todobaad kadib.

14. Badhitaanka dhiiggu waa waad qabtaa (positive). Maxay taasi ka dhigantahay maxaase xiga?

Haddii lagaa helo (positive) waxay ka dhigantahay in bakteeriyada ay jidhka xidhiidh la sameysay. (Su'aasha 2aad). Xafiiska Qaaxada ayaa adiga iyo dhakhtarkaaga idiin ogeysiin doona, wuxuuna xafiisku kaa codsan doonaa in aad ballan samaysatid si baadhitaan qotto dheer loo sameeyo (raajjo iyo wixii la mid ah), waxaana baadhitaanka qotoda dheer looga jeedaa in la sugo in ruuxu uu qaaxada qabo ama uusan qabin.

15. Waan qaaday cudurka. Dadka kale khatar ma ku ahay?

Maya! bakteeriyada oo aad qaadday macnaheedu ma aha in qaaxo kugu dhacday mana aha macnaheedu in aad gudbin kartid. (Su'aalaha 2, 4 iyo 6). In cudurka dhiiggaaga lagaa helay macnaheedu ma aha in aad dadka xidhiidhka kula sameynaya aad khatar ku tahay.

16. Waan qaaday cudurka. Khatar intee le'eg ayaa jirta in maalin un cudurku isoo rito?

Difaaca jidhka ayaa cudurka raadsada wuuna is gaabiyaa. 90% dadka bakteeriyada qaaxadu saamayso, **qaaxo kumaba** dhacdo. 10% ayey qaaxadu ku dhacdaa. Dadkaas nuskood laba sano gudohood ayey qaaxadu ku dhacdaa, nuskoodna xilliyo dambe oo noloshooda ka mid ah. (Su'aasha 4aad). Khatartu waxay sii badantahay marka difaacu daciif yahay (sida dadka fayraska HIV ga qaba, isticmaalka xilli dheer ee dawada cortsone ama daawada chemotherapy ee difaaca jidhka hoosta u dhigta ama haddii ruuxu qabo sonkorow ama isticmaalo khamaro ama tubaako).

17. Mar haddii aan bakteeriyada qaaday malla i dawayn karaa?

Mar haddii la hubsado in aad cudurka qaadday (Su'aasha 2aad) waxaa lagu daweeyaa dawooyin antibaayoyik ah. Ayada oy ku xidhantahay nooca antibaayogga la adeegsanayo, daweyntu waxay qaadataa afar ilaa sagaal bilood. Taladu waa in aad dawada qaadatid, maxaa yeelay waxay aad hoos ugu dhigaysaa in aad mar dambe qaaxo qaadid. Ama dawaynta sidaa halloo qaato ama yaan loo qaadane, waa in go'aanka ay wada qaataan qofka xanuunsan iyo dhakhtarka dawaynaya.

18. Yaa wax bixinaya?

Xaafaduhu way ku kala duwanyihiin qaybsiga qaraamaha daweynta cudurka qaaxada. Xafiiska Jimciyadda Sambabka (Cantonal Lung Association) farxad ayay u noqoneysaa in ay ku siiyaan macluumaadka waxyaabaha kuu furan ee xaafadaada laga adeegsado.

19. Ka sokow xafiisyada Qaaxada ee xaafadaha, ma jirtaa xarun wadani ah oy Swiss leedahay oo lala xidhiidhi karo si su'aalo ku saabsan qaaxada loo waydiiyo?

Haa, waxaa jirta Xarunta Maaraynta Qaaxada (Competence Centre Tuberculosis) ee raacsan Jimciyadda Sambabka ee Ururka Sanbabada Swiss (Swiss Lung Association) xaruntaas oo Xafiiska Caafimaadka Dadwaynaha ee Federaalka ee caafimaadku uu hawlo kala gaddisan u xil saaray. Faahfaahin dheeri ah waxaa laga heli karaa www.tbinfo.ch.

20. Sida loo sameeyo baadhitaanka xidhiidh samaynta?

Marka xaalad qaaxo la baadhayo, waa in ay tan usoo sheegaan dhakhtarka daweynaya, iyo shaybaarkuba Mas'uulka Caafimaadka ee Cantonal ee deegaanka canton ee uu kaanku dagganyahay. Mas'uulka Caafimaadka Cantonal ayaa go'aan ka gaadhaya natiijada baadhitaanka in la sameeyo baadhitaan xidhiidh samayn iyo in kale. Arrintaa waxaa la sameeyaa haddii la helo in cudurku uu yahay qaaxada sambabka ee la kala qaado. Haddii xaaladuhu sidaas yihiin, Xafiiska Qaaxada ee Ururka Sanbabka ee Cantonal ayaa samayn doona baadhitaanka isugubinta. Jimciyaddu waxay la xidhiidhaysaa bukaanka. Waxaa la isla qorayaa magacyada dadka ay dhici karto in ay khatar ugu jiraan in uu cudurkani ku dhoco (Su'aasha 8aad). Sida qaanuunku yahay, kuwani waa kuwa ka tirsan qoyska, asxaabta waligood isla jooga, dadka shaqo wadaaggu ka dhexeeyo ama dadka ciyaarta ama xilliyada firaaqada lala wadaago. Dadkan ayaa arrintan la ogeysiinayaa waana labaadhi in cudurku ku dhacay iyo in kale. (Su'aasha 12aad).

Ma ogayd in …

… Qaaxadu waa cudur la isu gudbiyo oy tahay in loo soo sheego Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Guud (Federal Office of Public Health (FOPH)?

… Xilligan tirada dadka ay ku dhacdo qaaxadu ayaa ah inta u dhexeysa 500 ilaa 550 ruux sannad kasta.

… Qaaxada si fiican ayaa loo daweeyaa, waa haddii daawada loo qaato qaabka ay u talo bixiyeen Jimciyadda Sambabka ee Swiss (Swiss Lung Association) iyo Xafiiska Federaalka ee Caafimaadka Guud (FOPH).

… Qiyaastii ilaa 1,8 malyan oo ruux ayaa aduunka ula dhinta cudurka qaaxada (waxaana ugu badan wadamada soo koraya)?

Warqadda Xaqiiqada ee Su'aalaha inta badan la is waydiiyo (Fact sheet FAQ) Luuqadaha kale:

Competence centre tuberculosis
Chutzenstrasse 10
3007 Bern
Phone 031 378 20 50
Fax 031 378 20 51
tbinfo@lung.ch
www.tbinfo.ch

Xafiisyada Qaaxada

Aargau/Basel-Land
Lungenliga Aargau
Hintere Bahnhofstrasse 6
Postfach
5001 Aarau
Tel. 062 832 40 00
Fax 062 832 40 01
lungenliga.aargau@llag.ch

Basel Stadt
Kantonsärztlicher Dienst
St. Alban-Vorstadt 12
4001 Basel
Tel. 061 267 95 26
Fax 061 267 95 28
gsd@bs.ch

Bern
Tuberkulose-Beratung
Universitätsklinik für Infektiologie
Inselspital
3010 Bern
Tel. 031 632 60 69
tb.info@insel.ch

Fribourg
Ligue pulmonaire fribourgeoise
Route St-Nicolas-de-Flüe 2
Case postale 96
1705 Fribourg
Tel. 026 426 02 70
Fax 026 426 02 88
info@liguepulmonaire-fr.ch

Genève
Centre antituberculeux de Genève
Rue Gabrielle Perret Gentil 6
1211 Genève
Tel. 022 372 95 44
Fax 022 372 99 29
cat.infirmieres@hcuge.ch

Glarus
Lungenliga Glarus
Wiggispark
8754 Netstal
Tel. 055 640 50 15
Fax 055 640 53 32
lungenligaglarus@bluewin.ch

Graubünden
Lungenliga Graubünden
Gürtelstrasse 80
7000 Chur
Tel. 081 354 91 00
Fax 081 354 91 09
info@llgr.ch

Jura
Ligue pulmonaire jurassienne
Place de l'Eglise 7
2800 Delémont
Tel. 032 422 20 12
Fax 032 422 20 45
direction@liguepj.ch

Luzern-Zug/
Nidwalden/Obwalden
Lungenliga Luzern-Zug
Schachenstrasse 9
6030 Ebikon
Tel. 041 429 31 10
Fax 041 429 31 11
info@lungenliga-lu-zg.ch

Neuchâtel
Ligue pulmonaire neuchâteloise
Rue de la Gare 4
2034 Peseux
Tel. 032 886 82 60
Fax 032 886 82 61
ligue.pulmonaire@ne.ch

St. Gallen/
Appenzell AI/Appenzell AR
Lungenliga St. Gallen
Kolumbanstrasse 2
Postfach
9008 St. Gallen
Tel. 071 228 47 47
Fax 071 228 47 48
info@lungenliga-sg.ch

Schaffhausen
Lungenliga Schaffhausen
Grabenstrasse 7
8200 Schaffhausen
Tel. 052 625 28 03
Fax 052 625 37 74
info@lungenliga-sh.ch

Schwyz
Lungenliga Schwyz
Bahnhofstrasse 29
6440 Brunnen
Tel. 041 857 00 16
Fax 041 857 00 17
brunnen.llsz@hin.ch

Solothurn
Lungenliga Solothurn
Dornacherstrasse 33
Postfach 563
4501 Solothurn
Tel. 032 628 68 28
Fax 032 628 68 38
info@lungenliga-so.ch

Thurgau
Lungenliga Thurgau
Bahnhofstrasse 15
Postfach 251
8570 Weinfelden
Tel. 071 626 98 98
Fax 071 626 98 99
info@lungenliga-tg.ch

Ticino
Lega polmonare ticinese
Via alla Campagna 9
6904 Lugano
Tel. 091 973 22 80
Fax 091 973 22 89
legapolm@bluewin.ch

Uri
Lungenliga Uri
Seedorferstrasse 19
6460 Altdorf
Tel. 041 870 15 72
Fax 041 870 18 58
lungenliga.uri@bluewin.ch

Valais
Ligue pulmonaire valaisanne
Rue des Condémines 14
Case postale 888
1951 Sion
Tel. 027 329 04 29
Fax 027 329 04 30
info@psvalais.ch

Vaud
Ligue pulmonaire vaudoise
Avenue de Provence 4
1007 Lausanne
Tel. 021 623 38 00
Fax 021 623 38 10
info@lpvd.ch

Zürich
Verein Lunge Zürich
Tuberkulose-Zentrum
Wilfriedstrasse 7
8032 Zürich
Tel. 044 268 20 95
Fax 044 268 20 20
tuberkulose@lunge-zuerich.ch

Fürstentum Liechtenstein
Amt für Gesundheit
Aeulestrasse 51
Postfach 684
FL-9490 Vaduz
Tel. 00423 236 73 34
Fax 00423 236 73 39
info@ag.llv.li